

Maxaad u baahan tahay si aad dugsiga sare uga qallin-jebiso?

18 dhibco oo qasab ah

Ardaydu waa in ay dhibacyadan qasabka ah kasbadaan si ay u helaan Shahaadada Dugsiga Sare ee Ontario:

4	dhibacyo Ingiriis ah (1 dhibac fasalkiiba)*
3	dhibacyo xisaab ah (1 dhibac Fasalka 11 ama 12)
2	dhibacyo saynis ah
1	dhibac taariikhda Kanadiyan ah
1	dhibac jiquraafi Kanadiyan ah
1	dhibac maadada aadaabta ah
1	dhibac waxbarashada caafimaadka iyo waxbarashada jirka
1	dhibac luqadda Faransiiska sida luqad labaad
0.5	dhibac barashada shaqada ah
0.5	dhibac cilmiga bulshada

Taa waxaa raacsan, ardaydu iyo hamaystiraan:

<input checked="" type="checkbox"/>	12 dhibacyo iqtiyaari ah†
<input checked="" type="checkbox"/>	40 saacaddood oo howlo jaaliyadda loo qabto
<input checked="" type="checkbox"/>	shuruuddaha wax aqriska iyo qorista ee gobolka

* Ugu badnaan 3 dhibac oo Ingiriis sida luqadda labaad (ESL) ama Horumarka Aqriska iyo Qoriska Ingiriiska (ELD) waxaa dhici karta in loo xisaabo dhibicyada luqadda Ingiriiska ee qasabka ah, laakiin tan afaraad waa in ay ahaataa dhibac loo kasbadey koorsada Ingiriiska qasabka ah ee Fasalka 12.

** Qeybaha 1, 2, iyo 3, ugu badnaan 2 dhibacyo oo maadada Faransiis sida luqadda labaad ayaa loo xisaabi karaa sida dhibacyo qasab ah, qeybta 1 hal iyo qeybta 2 ama qeybta 3 hal.

*** Ugu badnaan 2 dhibacyo ee maadooyinka waxbarashada (cooperative education) ayaa dhibacyada qasabka ah loo xisaabi karaa.

† 12 dhibacyo oo iqtiyaariga ayaa dhici karta in lagu daro ilaa 4 dhibcood ee aad ka kasbatey koorsooyinka labada dhibacood ee la ansaxiyay

Intaa waxaa dheer hal dhibac oo ka mid ah qeybaha soo socda:

Qeybta 1:

- Maadooyinka Ingiriiska ama Faransiiska sida luqadda labaad**
- Luqadda dhaladka
- luqad dhaqan ama caalami ah
- sayniska bulshada iyo barashada adabka aadanaha
- Barashada Kanadiyanka iyo dunida
- waxbarashada la talinta iyo shaqada
- waxbarasho iskaashi***

Qeybta 2:

- dhibac waxbarashada caafimaadka iyo waxbarashada jirka
- aadaabta
- barashada ganacsiga
- Maadada Faransiiska sida luqadda labaad**
- waxbarasho iskaashi***

Qeybta 3:

- saynis (Fasalka 11 ama 12)
- barashada teknoolajiga
- Maadada Faransiiska sida luqadda labaad**
- barashada combiyutarrada
- waxbarasho iskaashi***